**Soo Koobidda Maamulka**

Intii lagu jiray kulankii sharci dejinta ee 2019-kii, sharci dejinta ayaa ansixisay, iyada oo Guddoomiyaha Gobolkuna saxiixday Sharciga Senate-ka 577. Qaybta 9 ee sharcigu waxay uga baahan tahay Guddiga Caddaalada Dembiyadda ee Oregon (CJC) in ay dib u eegaan dhammaan xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn si loo soo sheego natiijada sanad walba Luulyo 1. Tani waa warbixin sanadeedkii shanaad waxayna ka hadlaysaa xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn ee ka dhacay Oregon intii lagu jiray taariikh sanadeedkii 2020 ilaa 2023. Qof kasta oo daneynaya in uu eego warbixinta oo dhan wuxuu sidaasi sameyn karaa isaga oo nuqul ka codsanaya CJC oo laga helo 503-378-4830 ama iyada oo la galayo meeshan la sii gelayo: https://www.oregon.gov/cjc/CJC%20Document%20Library/SB577ReportJuly2024.pdf. Weydiimaha guud ee ku saabsan warbixintani waa in lagu hagaajiyo CJC oo laga helo 503-378-4830. Su'aalaha gaarka ah oo ku saabsan waxa ay ka kooban tahay warbixintani waxaa lagu hagaajin karaa Ken Sanchagrin, Agaasimaha CJC, oo laga helo 971-719-6000 ama ken.sanchagrin@cjc.oregon.gov.

Warbixinta buuxdaa waxay muujinaysaa xog kooban iyo falanqeynta dhabta ah ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn oo laga helay ilo xogeed oo dhowr ah oo uu ku jiro Khadka Ka Jawaabida Eexda (oo loo yaqaan *BRH* ama *Hotline* warbixintani dhexdeeda) oo ay aasaaastay Waaxda Caddaalada ee Oregon (DOJ) waxaa ka go'an caawinta dhibanayaasha, markhaatiyaasha, iyo soo sheegayaasha kale ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn. Intaasi waxaa dheer, in warbixintu muujinayso xog ku saabsan dembiyada eexda la xiriira oo laga soo qaatay Nidaamka Warbixinta Ku saleysan Dhacdada Qaranka (NIBRS) ee Oregon oo ku yaala Booliska Gobolka Oregon (OSP) gudahiisa, xogta ku saabsan dacwad isku soo oogista dembiyada eexda oo ka socota 34 ah xafiisyada qareenada degmada,[1] xogta xiritaanka dadka 'arrest' oo ka socota Nidaamka Xogta ee Fulinta Sharciga (LEDS) ee qaranka, xogta maxkamadda ee dembiyada eexda oo ka socota nidaamka xogta Odyssey ee Oregon, xogta isku xumida iyo xukunka ee dembiyada eexda oo ka socota Waaxda Asluubta ee Oregon (DOC). Natiijooyinka Xogta (Hotline) ee Waaxda Caddaalada waxay tilmaamayaan warbixinta dembiyada eexda iyo dhacdada eexda ee bilawga ah, oo si wadajir ah loogu yaqaano *warbixinta eexda-ku dhisan "bias-motivated reports."*[2]

Natiijooyinka Muhiimka ah

- Warbixinta loo soo gudbiyay Khadka tooska ah ayaa korodhay sanadkii intii lagu jiray muddo 4 afar sano ka kooban 2020 ilaa 2023, iyada oo korodhka guud yahay boqolkiiba 229% iyada oo ahayd 1,101 sanadkii 2020 oo noqotay 3,623 sanadkii 2023 (fiiri Tirada 1 iyo Shaxanka A1 ee Lifaaqa A).
- Warbixinta eexda-ku dhisan "bias-motivated reports" (tusaale, dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda) ayaa kordhay sanadkii intii u dhaxaysay 2020 iyo 2023, iyada oo korodhka guud yahay boqolkiiba 222% muddadani, iyada oo ahayd 910 sanadkii 2020 oo noqotay 2,932 sanadkii 2023. Korodhkan sanadlahaha si isku mid ah uma saameynin dhammaan kooxaha jinsiyadaha:
  - Warbixinta eexda-ku dhisan "bias-motivated reports" ee Dhibbanayaasha Aasiyaanka ah ayaa gaartay meeshii ugu sarreysay sanadkii 2021 isaga oo ahaa 183.
  - Warbixinta dhibbanayaasha Hisbaanik/Laatiino ayaa gaartay meeshii ugu sarreysay sanadkii 2022 isaga oo ahaa 430.
  - Warbixinta dhibbanayaasha jinsiyada kale ayaa gaartay meeshii ugu sarreysay sanadkii 2023 isaga oo ahaa 420.

---

[1] Xog lagama helin 2 degaan: Columbia iyo Umatilla.

[2] Xogta Khadka tooska ah 'Hotline' ee lagaga hadlay warbixintani ayaa diiradda saareysa warbixinta eexda-ku dhisan ee bilawga ah, dhacdooyinka eexda iyo dembiyada eexda. *Warbixinta Soo noqnoqotay, Dembiyada Aexda/Nacaybka Lama Buuxin, Eex Ka dhan ah Dabaqad Aan La dhowrayn, iyo* warbixinta *La awoodi waayay In la go'aamiyo* ayaa lagaga hadlay Shaxanka 1, Tirooyinka 1-3, iyo Shaxanada A1-A7 ee Lifaaqa A oo lagu qeexay Go'aaminta Eexda.

    - Si kastaba ha ahaatee, dadka Madow/Maraykanka Madow ah ayaa si joogto ah halis sare ugu sugan, oo gaaraya in ka badan 500 warbixinood sanadkii (fiiri Shaxanka 2 iyo Shaxanada A8-A9 ee Lifaaqa A ee loogu talagalay qaab-dhismeedka dhibbanaha).
- Dhiirigelinta dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexdu wax kala duwan yihiin marka loo eego qaab-dhismeedka dhibbanayaasha:
    - Haweenka iyo shakhsiyaadka leh jinsi aan la shaacin ayaa inta badan la beegsaday iyada oo sababtu tahay isir-diidnimo, dalka laga soo jeedo, iyo diinta (inta badan Yuhuuda) iyo eexda midabka ku lidka ah, iyo ragga oo la beegsaday iyada oo sababtu tahay isir-diidnimo, dalka laga soo jeedo, iyo eexda midabka ku lidka ah.
    - Dhibbanayaasha caddaanka ah iyo kuwo leh jinsi aan la shaacin ayaa inta badan la beegsaday iyada oo sababtu tahay dookha galmo ama eexda aqoonsiga jinsi ahaaneed.
    - Dhibbanayaasha BIPOC ayaa inta badan la beegsaday iyada oo uu salka ku hayo isir: 95% Madowga/Maraykanka Madow, 76% Dadka Aasiya ka soo jeeda, 63% Hisbaanik, iyo 59% AI/AN ayaa la beegsaday iyada oo sababtu tahay eexda midabka ku lidka ah.
    - Shakhsiyaadka jinsiyada kale ayaa inta badan la beegsaday iyada oo sababtu tahay eexda ka dhanka ah diinta, gaar ahaan eexda ka dhanka ah Yuhuuda (81%).
    - Kooxaha da'aha kala duwan oo dhan ayaa inta badan la beegsaday iyada oo sababtu tahay eexda midabka ku lidka ah, marka laga reebo dadka ah 60 jir ama ka weyn, kuwaasi oo inta badan lagu beegsaday naafanimada iyo eexda ka dhanka ah diinta (fiiri Shaxanka 3 la xiriira dhiirigelinta eexda).
- Warbixinta eexda-ku dhisan ee dugsiyada ayaa hoos u dhacday sanadkii 2023 ka dib markii ay sanadkii 2022 gaartay meeshii ugu sarreysay oo ah 444. Dadka da'da yar ayaa weli halis ugu jira si kastaba ha ahaatee, iyada oo ku dhawaad 300 oo warbixinood ay sanadkii 2023 ka dhaceen nooc dhacdo oo goob dugsi ah (fiiri Tirada 9 iyo Shaxanada A23 iyo A24 ee Lifaaqa A). *Ogow*, heerka dhabta ah ee eexda dugsiyada dhexdooda lama garanayo.
- LEA-yada ayaa in ka badan 600 oo ah warbixinta dembiyada eexda u soo gudbisay BRH sanadkii 2020 ilaa 2023 (fiiri Shaxanka 4 iyo Shaxanka A22 ee Lifaaqa A). *Ogow*, BRH waxay la xiriirtaa dhibbanayaasha haddii la codsado oo kaliya.
- U soo sheegida hooseysa ee dembiyada eexda ee LE waa mid ballaaran. Sanadkii 2022 iyo 2023, xogta BRH waxay ka koobnayd in ka badan laba jeer tirada dhibbanayaasha sida laga helay NIBRS (fiiri Tirada 10). Soo sheegida hooseysa wax kala duwan tahay marka loo eego qaab-dhismeedka dhibbanayaasha: dadka caddaanka ah iyo ragga ayay u badan tahay in ay u soo sheegaan LE, iyada oo dadka ah BIPOC, dumarka iyo dhibanayaasha dembiga eexda ee dadka aan ku dhaqmin jinsiga 'gender non-conforming' ayay u badan tahay in ay waxyaabaha ay la kulmeen u soo sheegaan BRH.
- 155 ka mid ah kiisaska dembiga eexda ee ku jira xogta DA ee sanadkii 2023, boqolkiiba 19% waa la diiday/lama gudbin iyada oo 129 ama boqolkiiba 83% ay faylka u gashay in ay yihiin eex (68%) ama kiis aan eex ahayn (15%).
    - 129 kiis oo la gudbiyay, boqolkiiba 36% ayaa keenay xukun dhacay oo ah ugu yaraan hal eex oo la isku soo eedeeyay ama mid aan eex ahayn (tusaale, la qirtay dembi, ay xukuntay xeerbeegti ama maxkamadeeyay garsoore 'bench trial', ama heshiis qirasho la gaaray), boqolkiiba 58% ayaa furan, iyada oo dhammaan eedaymihii la laalay boqolkiiba 6% oo ah kiisaska (wixii la xiriira xogta u gaarka ah degmada, fiiri Shaxanka 16). Heerarka xukunka la riday ee kiisaska la gudbiyay sanadkii 2023 ayaa la filayaa in ay kordhaan bilaha soo socda marka kiisaska furan la dhammeystiro.
- Kiisaska la ciqaabay/la gudbiyay ee leh in la isku eedeeyay dembiga eexda ee u dhexeeyay 2000 iyo 2022 ayay u badan tahay in ay sababaan xukun dhaca oo ah ugu yaraan hal eedayn (72% guud ahaan;

57%-91% sanadkii), marka la barbardhigo kooxda isbarbardhiga ee eedaymaha caadiga ee sida wadajir ah u dhacaya (64% guud ahaan; 53%-72% sanadkii fiiri Tirada 16). [3]

- Xogtii 2023-kii ee LEDS, DA iyo Odyssey ee la isku daray waxay ka koobnayn 231 eedaysaneyaal (fiiri Shaxanka 22):
  - Kuwaasi oo, 138 eedaysaneyaal yeesheen xariga LEDS, 160 waxay ku jireen xogta DA (dhammaan kiisaska eedaysane kasta waa lagu tirayay faylka la isku daray) iyada oo 129 ay lahaayeen kiisaska dembiga eexda ee Odyssey.
- Farqi u dhexeeya xogta ayaa weli sii jira. Ku dhawaad saddex meelood (n = 71; 31%) oo ah eedaysanayaasha ku jira xogta la isku daray kuma aysan jirin xogta DA: 28 ayaa laga ogaaday Odyssey iyo 43 ka socday LEDS – ayay u badan tahay in ay matalaan baaritaannada LE ee la joojiyay ee aan loo gudbin DA-yada si loo xukumo (fiiri Shaxanka 22).

Talooyinka CJC

1. Haddii awoodu saamaxdo, LEA-yadu waa in ay bilaabaan/sii wadaan u gudbinta dhammaan dhibbanayaasha dembiga eexda iyo dhacdooyinka eexda ee BRH, bilaabaan/sii wadaan dhaqanka hadda ee u gudbinta warbixinta ee BRH – oo la ballaariyaan shuruudaha ka mid noqoshada ee dhammaan dembiyada iyo dhacdooyinka eexda ee la soo sheegay, muujiyaan in kiiska loo gudbiyay xafiiska degmada DA, oo sharraxaad ka bixiyaan haddii kiisku aanu ahayn. Eedaymaha la soo gudbiyo iyo wixii qiil loo yeelayo waa in sidoo kale xiriir lagala sameeyay dhibbanayaasha, tusaale, eedaynta(aymaha) ay u badan tahay in ay sababaan xukun dhaca ayaa la gudbiyay, iyada oo eexda la isku soo eedeeyay ee ay u badan tahay in la diido la laalay/ma jirin cabashada DA.
2. ODOJ waa in ay sii wadaa wacyigelinta warbaahinteeda iyo tababarka LE/DA. Korodhka loo kuurgalay ee dembiyada eexda ee loo soo sheegay BRH iyo nidaamka cadaaladda waxay u badan tahay in ay yihiin isku darka korodhka hab-dhaqanka eexda-ku dhisan, wacyigelinta dadweynaha ee ilaha ay heli karaan iyagu, iyo tababarka LE iyo DA si loo aqoonsado oo loo ciqaabo dembiyada eexda. Ku darida tababarada dadka wada shaqeeya ee LE iyo DA waa in la tixgeliyaa.
3. ODOJ waxay leedahay siyaasado la dejiyay si loo xaqiijiyo badbaadada iyo caafimaadka maskaxda ee dadka u dooda Khadka tooska ah. Siyaasadahani waa in loo arkaa in ay yihiin siyaasado kara, ay tahay, in wax laga beddelo iyada oo ku saleysan duruufaha is beddelaya. Iyada oo la eegayo korodhka soo sheegaha xaalada dembiilaha, tusaale, eexda lagu sameeyay Khadka tooska ah, ODOJ waa in ay tixgelisaa in ay dib eegis ku sameyso siyaasadaheeda si ay u ilaaliso shaqaalaha hadba sida loogu baahdo – ka dib marka la tashiga ku habboon lala sameeyo shaqaalaha ee dib u eegis lagu sameeyo siyaasadaha hay’adaha gobolka iyo federaalka ee loogu talagalay shaqaalaha kiiska iyo dembi baarayaasha sida joogtada ula tacaala dembiyada lagu yaqaan in ay kiciyaan dareennada xoogan (tusaale, dembiyada eexda, dembiyada galmada, rabshada qoyska, iyo xadgudubka carruurta).

[3] Waxaa ku jira eedaymaya soo socda: Weerar ah II-IV iyo Isku dayid dembi, Dhaqan xumo Dembiyeed oo Kasta (I-III), Xadgudubka Dembiyeed II, Ficil Nidaam xumo II, Dhibaatayn/Dhibaataynta Daran, Faragelinta Mas’uulka Nabada, Khatar gelinta ‘Menacing’, Ku Qaadashada/Ku Ridida Hub ee Magaalada dhexdeeda, Qof galay Dembiga Haysashada Hub, Faragelinta Gaadiidka Dadweynaha, Faragelinta Dadweynaha, Gaadiidka, Si aan taxaddar lahayn Halis u gelinta Qof kale, Iska caabinta Xariga, Hubka Xaddidan/qof hore loo xukumay Haysto, Dhac III iyo Isticmaalka Hub ee si Sharci darro ah.